



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 19, 2021

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Cododka naafanimada ayaa looga baahan yahay Guddiga Xuquuqda Aadanaha

Waxaan u baahanahay caawimaadaada! Labo boos oo shaqo oo ka bannaan Guddiga Xuquuqda Aadanaha oo cusub ayaa weli loo baahan yahay in la buuxiyo.

Fadlan tixgeli codsashada in aad xubin ka noqoto Guddiga, haddii aad tahay:

- walaalka qof qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD), ama
- qayb ka tahay urur u dooda naafanimada

Ma ku habboon tahay mid ka mid ah doorarkaasi? Ma daneynaysaa xuquuqda dadka? Haddii ay sidaasi tahay, fadlan codso!

Labadan boos ee shaqo waxay codka dadka naafada ah iyo qoysaskooda u keenayaan shaqadan muhiimka ah.

Guddiga Xuquuqda Aadanaha waa natiijo ka dhalatay Xeerka Oregon ([Sharciga Senate-ka 493](#)). Doorka Guddigu waa in ay ilaaliyo sharafta iyo xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha ee dadka qaba I/DD. Guddigu waxay noqon doontaa ilo muhiim ah oo ay leeyihiin dadka ka tirsan I/DD ee ku nool Oregon waxaanan dhiirigelinaynaa qof kasta oo daneynaya ka mid noqoshada xubin ka tirsan Guddiga si uu waxyaabo dheeraad ah uga ogaado iyada.

Sharciga ayaa si gaar ah u tilmaamaya xubinimada dadka ee doorarka qaarkood (sida ahaanshaha qof qaba I/DD ama adeeg bixiye). Waxaa sidoo kale muhiim ah in Guddigu ka turjunto kala duwanaanshaha gobolkeena iyo dadka aan taageerno.

Fadlan fiiri warqada ku lifaaqan wixii faahfaahin ah ee ku saabsan xubinimada iyo sida loo codsado. Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ayaa hadda aqbalaaya [codsiyada](#) loogu talagalay xubnaha ka tirsan Guddiga. Fadlan codso ka hor Juun 1, 2021.

Waxaan kugu dhiiri gelinaynaa in aad si guud u wadaagto warqada. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan Guddiga ama boosaska shaqo ee bannaan, fadlan xiriir Brooke Hall, 971-707-3847, brooke.m.hall@dhs.oregon.gov.

Fadlan naga caawi sii gudbinta hadalka!

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.

Raadinta codsadyaasha loogu talagalay Guddiga Xuquuqda Aadanaha

Waxaa jira laba shaqo oo ka bannaan Guddiga.

Fadlan tixgeli codsashada in aad xubin ka noqoto Guddiga, haddii aad tahay:

- walaalka qof qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD), ama
- qayb ka tahay urur u dooda naafanimada



Ma ku habboon tahay mid ka mid ah doorarkaasi? Ma daneynaysaa xuquuqda dadka? Haddii ay sidaasi tahay, fadlan codso!

Sida loo codsado

Guddoomiyaha gobolka ayaa magacawda xubnaha ka tirsan Guddiga. Ka codso

https://www.oregon.gov/gov/admin/Pages/How_To_Apply.aspx

Goorta la codsanayo

Fadlan codso ka hor Juun 1, 2021.

Ku saabsan talagalay Guddiga Xuquuqda Aadanaha

Guddigu waxay ilaalisaa sharafta iyo xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha ee dadka qaba I/DD.

Xubnuhu waxay gacan ka geystaan abuurida xeerar iyo siyaasado loogu talagalay sida ay Guddigu u shaqeyn doonto. Waxay dejiyaan guddiga la talinta ee heer gobol si loo daboolo gobolka.

Guddiga ayaa kor kala socota guddiyada. Guddiga ayaa hesha isla markaana xallisa cabashooyinka ku xadgudubka xuquuqda dadka sida ku qeexan xeerka Gobolka. Xubnaha ka tirsan guddiga ayaa u kulma hadba sida loogu baahdo, sida caadiga ah bil kasta. Muddo-xilleedka guddigu waa saddex sano. Xubnaha dib ayaa loo magacaabi karaa si ay u shaqeeyaan laba muddo-xilleed.

Waxyaabo dheeraad ah ka ogow:

Akhri sharciga:

<https://olis.leg.state.or.us/liz/2019R1/Downloads/MeasureDocument/SB493/Enrolled>

Su'aalaha?

Fadlan la xiriir Brooke Hall, 971-707-3847, brooke.m.hall@dhsosha.state.or.us.